



DIGNIIN: Xarumaha dib u warshadeynta ee ku yaala Dotzheim iyo Nordenstadt ayaa hadda xiran.



Kala saarista qashinka

OO LEH TALOYIN LOOGU TALAGALAY KA FOGAADINT SAMAYNTA QASHINKA

ELW

Cinwaanada iyo saacadaha furitaanka

Xarumaha dib u warshadaynta

- Wiesbaden-Nordenstadt, Borsigstraße
- Wiesbaden-Dotzheim, Willi-Werner-Straße 11
- Wiesbaden-Bierstadt, Kloppenheimer Straße 30

Saacadaha furitaanka:

Talaado ilaa Jimcaha laga bilaabo 8:30 a.m. ilaa 5 p.m. iyo Maalmaha Sabtida 8.30 a.m. ilaa 4 p.m.

Qashin-qubka

Deponiestraße 15

- Meel yar oo qashinka lagu aruuriyo (ay ku jirto xarunta dib u warshadaynta)
- Aqbalaada qashinka khatarta yar

Saacadaha furitaanka:

Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 7 a.m. ilaa 3:30 p.m. iyo Maalmaha Sabtida laga bilaabo 8 a.m. ilaa 1 p.m.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xarumaha dib-u-warshadaynta iyo meelaha yaryar ee qashinka lagu uruuriyo waxa laga heli karaa buug-yarahayaga "Tuuritaanka habboon ee qashinka dib-loo-warshadayn karo" ama khadka internetka ee www.elw.de. Warqadda waxaa laga heli karaa maamulada deegaanka, Xafiiska Muwaadiniinta iyo Dukaanka Deegaanka.

Bakhaar leh albaabka ELW

Unterer Zwerchweg 120, 65205 Wiesbaden

Albaabka wuxuu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 7 a.m. ilaa 8 p.m..

Xarunta Adeegga ELW

Taleefanka: 0611 7153-0, liimaylka: elw@elw.de

Shaqaalaha jooga xarunta adeegga iyo adeegga qashinka aadka u badan waxa lala xiriiri karaa Isniinta ilaa Khamiista 8 a.m. ilaa 2:30 p.m. iyo Jimcaha laga bilaabo 8 a.m. ilaa 12:30 p.m.

Khadka nadaafadda ee Wiesbaden

Taleefanka: 0611 7153-1 ama iyadoo la isticmaalayo Ablikeeshinka ELW "Saubereres Wiesbaden"

Kalandarka qashinka qaadista

www.elw.de ama iyadoo la isticmaalayo ablikeeshinkeena "ELW-Abfallkalender"

Suuqa hadiyadaha

www.elw.de

Qashinka biraha dhismaha iyo dhulka ama qashinka beerta la qoday oo la kala soocay

Weelka yar

Adeegga weelka ELW

Taleefan: 0611 7153-2

liimaylka: containerdienst@elw.de



Waxaan bixinaa weelasha ah 1 ilaa 36 m³.

* Qiimaha waxaa loo oggolyahay magaalada Wiesbaden

ELW

Kala soocida qashinka waa mid haboon oo sahlan

Anaga oo ah shirkadda qashin qaadista ee degmadaada, waxa aanu masuul ka nahay in aanu xaqiijino in qashinka ka soo baxa gurigaaga maalin kasta la ururiyo loona qaado si sax ah.



Afar weel oo weelashada qashinka ah ayaa waa qasab ah!

Waxaanu ku siinaynaa afar weel oo kala duwan si aad si fudud oo habboon ugu rido qashinkaaga sida tooska ah uga soo baxa gurigaaga: weelka qashinka haraaga ah, weelka qashinka dabiiciga ah, weelka qashinka waraaqaha iyo weelka qashinka dib loo warshadayn karo. Xeerka maareynta dib u warshadaynta qashinka ee magaalada Wiesbaden wuxuu kugu waajibinayaa inaad qashinka kala soocdo oo aad si gooni-gooni ah ugu riddo weelasha. Intaa waxaa dheer, waxaad isticmaali kartaa afarteena xarumood ee dib-u-warshadaynta qashinka, adeegga qashinka aadka u badan, aqbaaladda qashinka khatarta yar leh, adeega warwareega ee uruurinta qashinka khatarta ah iyo weelasha badan ee lagu rido dhalooyinka la isticmaalay iyo dharka la isticmaalay si loogu tuuro weelka qashinka ee ku habboon.

Kharashaadka qaadista qashinka Wiesbaden waa yar yahay!

Waxaan sameynaa wax kasta oo aan awoodno si aan u yareyno khidmadaha qaadista qashinka. Habkayaga shaqada ee qiimaha yar ayaa xaqiijinaya inaan nahay mid ka mid ah magaalooyinka Jarmalka ee bixiya saami wanaagsan oo qiimaha/waxqabadka marka laga hadlayo khidmadaha qaadista qashinka. Waxay sii ahaanaysaa sidaas! Caadiyan, khidmadaha qaadista qashinkaaga waxay ku salaysan yihiin xajmiga iyo soo noqnoqodka faaruqinta ee qashinka hadhaaga ah. Tuurista qashinka waraaqaha ah, qashinka dabiiciga ah iyo alaabta dib loo warshadayn karo

ayaa durba ku jira kharashka – maadaama uu yahay isticmaalka dhammaan adeegyada kale ee qoysaska gaarka loo leeyahay.

Dib-u-warshadaynta qashinka waxa ka dhigan tahay ilaalinta kheyraadka.

Aan wada ilaalino deegaanka. Ka faa'iidayso adeegyada ururinta qashinka ee goonida ah.

Bogagga soo socda waxaad ka heli doontaa dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan sida saxda ah ee qashinka loo tuuro.

Ka hortagga qashinka

Hadafka koowaad waa in laga fogaado samaysanka qashinka. Qashinka ugu fiican waa qashinka aan la samayn gabi ahaanba. Istimmaal talooyinkeena si aad uga fogaato samaysanka qashinka.

Dhammaan taariikhaha qaaditaanka qashinka

waxaa laga heli karaa www.elw.de jadwalka qashinka ama ablikeeshinkaana kalendarka.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa www.elw.de ama shaqaalaha Xarunta Adeegga ELW: Taleefan 0611 7153-0.



Weelka qashinka dib-u-warshadaynta galaasyada, dhalooyinka iyo jeegaga dhalad ah ayaa si gooni gooni ah loo ururiyaa iyadoo loo eegayo midabada caddaan, cagaar iyo bunni.

Dhalooyinka iyo galaasyada midabada kale ah (casaan, buluug, guduud, jaalle) ayaa lagi ridayaa weelka galaaska ee cagaaran.



Goobaha dhammaan weelasha dhalada ah waxaa laga heli karaa khadka www.elw.de.

Muraayadaha qashinka ah ee la ururiyey waxaa loo qaadaa warshadda dib-u-warshadaynta, iyadoo lagu kala soocayo midabkeeda.

Soo saarista dhalooyinka weelka cad, nadiif ahaanshaha midabka 99.7% ee galaaska qashinka ee la isticmaalo ayaa loo baahan yahay. Saamiga midabada ka baxsan muraayadda buniga ah waa in aanay ka badnayn 8%. Keliya muraayadda cagaaran ayaa loo oggolyahay in doorsoomida midabkeedu noqdo ilaa 15%. Sidaa darteed, muraayadaha midabada kala duwan leh ayaa lagu ridi karaa weelka dhalooyinka cagaaran.

Dhalooyinka, seraamiga, galaaska filooyinka ah ama muraayadaha fidsan sida muraayadaha daaqadaha laguma ridayo weelka dib-u-warshadaynta dhalooyinka sababtoo ah waxay waxyaabaha ku jira weelkaas ka dhigayaan kuwo aan dib loo warshadayn karin.

Shirkadda MS Umweltservice GmbH waxay aruurisaa galaasyada qashinka ah ee magaalada oo dhan. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ururinta dhalooyinka la isticmaalay, fadlan si toos ah ula xiriir MS Umweltservice, taleefanka: 0800 3098999.



HAA!

alaabtaani waxaa lagu ridayaa weelka dib u warshadaynta dhalooyinka

- Jeegaga dhalada ah ee Mason
- Dhalooyinka la tuuri karo
- Dhalooyinka qasacadaysan iyo macaanka lagu keydiyo
- Dhalooyinka wax lagu baakadeeyo iyo weelasha muraayadaha daawada



MAYA!

alaabtaani laguma ridayo weelka dib u warshadaynta dhalooyinkar

- Muraayadaha shaashadda ee telefishinada iyo kombiyuutarada
→ Qashinka haraaga ah
- Muraayadda liidhka iyo kiristalka ah
→ Qashinka haraaga ah
- Muraayadaha badbaadada ee fiilada ah ee daaqadaha
→ Qashinka haraaga ah
- Nalalka tamarta kaydiya
→ Qashinka khatarta ah (aqbalaada goobta uruurinta qashinka yar ee khatarta ah iyo goobta uruurinta qashinka khatarta ah ee warwareegta)
- Galaasyada iyo muraayadda daaqadaha
→ Qashinka haraaga ah
- Nalalka iftiinka
→ Qashinka haraaga ah
- Muraayadaha kulaylka u adkaysta
→ Qashinka haraaga ah
- Tuubooyinka nalalka dhaadheer
→ Qashinka khatarta ah (aqbalaada goobta uruurinta qashinka yar ee khatarta ah iyo goobta uruurinta qashinka khatarta ah ee warwareegta)
- Beeyada, seraamiga, carada la qalajiyay iyo dhoobada
→ Qashinka haraaga ah
- Galaasyada cabitaanka
→ Qashinka haraaga ah



Talooyinka ka fogaanshaha qashinka


Cab biyaha tuubada

Biyaha tuubada ayaa ah cuntada ugu fiican ee la xakameeyo waxayna sidoo kale bedel u tahay cabitaannada fudud ee caadiga ah iyadoo la kaashanayo waxyaabaha dhadhanka u yeela. Wiesbaden waxaa ku yaala meelo badan oo "xarumo dib-u-buuxinta" ah halkaas oo aad ku buuxin karto dhaladaada weliba si bilaash ah. Waxaa lagu calaamadeeyay astaanta hoose.

Isticmaal dhalooyinka dib loo buuxin karo.

Warqadaha iyo kartoonaada ayaa lagu ururiyaa weelka qashinka waraaqaha.

Weelasha qashinka waraaqaha ah waxaa lagu heli karaa cabbirro 120 litir, 240 litir iyo 1,100 litir ah. Isteebadala warqadaha lagu dhejiyo waxay ku sii jiri karaam majaladaha iyo buug-yarayaasha, laakiin waa in aad ka saartaa CD-yada ku dhegga ama muunadaha la isku qurxiyo. Fadlan ka saar koolooyinka aadka u badan kartoonaada ka dibna laalaab ama jarjar kartoona.



HAA!

alaabtaani waxaa lagu ridayaa weelka qashinka waraaqaha

- Baqshadaha (sidoo kale leh daaqad wax laga dhex arki karo)
- Bacaha rootiga (sidoo kale leh daaqad wax laga dhex arki karo)
- Buugaagta yaryar iyo buugagta caadiga ah
- Kartoon, kartoon, baakadaha warqada ah
- Buug-yaraha, buugaagta yaryar iyo waraaqaha
- Waraaqaha wax qorista, koobiyeynta iyo kombiyuutarka
- Wargeysyada iyo majaladaha



MAYA!

alaabtaani laguma ridayo weelka qashinka waraaqaha

- Warqad dubista, warqadaha aan dufan lahayn, warqadaha dahaaran iyo warqadaha kaarboonka
→ Qashinka haraaga ah
- Waraaqaha sawirrada
→ Qashinka haraaga ah
- Waraaqaha nadaafadda iyo tiishuuyada (tusaale ahaan, maro-gacmeedyada waraaqaha ah)
→ Qashinka haraaga ah
- warqad aad u wasakh badan
→ Qashinka haraaga ah
- Saxan warqad ah
→ Qashinka haraaga ah
- Sawirada waaweyn ee derbiyada lagu dhejiyo
→ Qashinka haraaga ah
- Warqadaha kuleyl ah (rasiidhyada)
→ Qashinka haraaga ah
- Baakadaha isku dhafan, sida kartoonaada caanaha iyo cabitaanka
→ Weelka qashinka dib u warshadaynta



Weelasha qashinka ee waraaqaha waa inay diyaar u yihiin faarujinta 6 a.m. maalinta la ururinayo qashinka waana in la soo celiyaa ka dib faarujinta. Weelka qashinka soo dhig wadada dhinaceeda si uusan weelka qarqalad ugu noqonin dadka lugeynaya ama gaadiidka wadooyinka.

Waraaqaha qashinka ah waxaa loo isticmaalaa in lagu soo saaro warqad dib loo warshadeeyay (tusaale ahaan baakadaha ama wargeysyada). Dib u warshadaynta waraaqaha waxay yaraynaysaa isticmaalka waxyaabaha waraaqaha laga sameeyo iyo sidoo kale isticmaalka biyaha iyo tamarta. Suuqgeynta waraaqaha qashinka ah waxay kaliya ulajeedkeedu yahay in la xasilliyo kharashka qashin-qubka. Sida ugu badan ee waraaqada qashinka ah si gooni ah loo uruuriyo, ayaa dakhli badan u soo gala ELW.

Talooyinka ka fogaanshaha qashinka

Isticmaal warqadaha dib loo warshadeeyey

Xaqiiji inaad isticmaasho warqadaha dib loo warshadeeyn karo. Dhammaan warqadaha wax qorista iyo waraaqaha nadaafadda ee laga sameeyay warqad deegaanka u roon waxay xambaarsan tahay calaamada midabka buluugga ah ee deegaanka.





Dhammaan waxyaabaha dabiiciga ah ee laga helo jikada iyo qashinka beeraha waxaa lagu ridayaa weelka qashinka dabiiciga ah!

Yaanyada balooshey, bacaha shaaha, lafaha kalluunka, farmaajada halowday - wax kasta oo qudhmi kara (ama durba ku jira hannaanka qurmida) waxaa loo bedeli karaa tamar qiimo leh. Qashinka dabiiciga ah ee Wiesbaden, arrintaas waxay ka dhacdaa Flörsheim-Wicker ee warshadda tamarta waxyaabaha dabiiciga ah ee Rhein-Main-Deponie GmbH. Bacaha qashinka cagaaran waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa goynta caleemaha ama cawska. Waxaad kuwan ku iibsana kartaa 1.95 yuuro. Fadlan bacaha soo dhig wadada dhinaceeda si loo uruuriyo maalinta qaadista qashinka dabiiciga ah.



Caawiyeyaal wax ku ool ah oo loogu talagalay ururinta qashinka dabiiciga ah - ee nadiifinta qashinka jikada

Bacaha uruurinta qashinka dabiiciga ah ee ka samaysan bacyaha cida ku milma waa ka mamnuuc Wiesbaden. Taa baddalkeeda, waxaad bacaha waraaqaha ah ama wargeysyada u isticmaali kartaa ururinta qashinka dabiiciga ah.

Weelasha qashinka dabiiciga ah ee jikada: Astaanta "classic" ee weelka qashinka dabiiciga ah waxa qaadaysaa 10 litir oo qiimaheeduna waa 9.50 yuuro. Waxaa si fudud loogu dari karaa bacaha qashinka dabiiciga ah ee ganacsi ahaan loo heli karo. Qof kasta oo jeclaan lahaa inuu ku dhejiyo istikarka "Wax balaastig ah laguma dhex dari karo qashinka dabiiciga ah" wuxuu ku soo qaadan karaa istiikar bilaash ah xarumaha dib u warshadaynta ee meelaha yaryar ama dukaanka deegaanka. Maamulka guriga iyo adeegyada daryeelida guriga waxay ELW ka codsan karaan istiikarada iyadoo isticmaalka iimaylka - elw@elw.de.

Halkan waxa aad ka heli kartaa weelasha qashinka dabiiciga ah iyo bacaha waraaqaha qashinka cagaaran ee xarumaha dib u warshadaynta ee

ELW, meelaha yaryar ee laga aqbalo qashin qubka iyo dukaanka deegaanka, Luisenstraße 19. Weelasha qashinka dabiiciga ah waa la faarujiyaa iyada oo qayb ka ah adeeg buuxa; waxaa dibadda u soo saara oo haddana dib u soo celiya shaqaalaheenna ka dib marka ay faarujiyaan.



HAA!

walxahaasi waxaa lagu ridayaa weelka qashinka dabiiciga ah

- Qolfoofka ukunta
- Warqada wax lagu duubo tusaale ahaan xaashida bocorka, duubka jikada
- Cuntada haraaga ah (ay ku jiraan cuntoo-yinka qurmay/xun)
- Qashinka khudradda ah
- Cawska, geedaha iyo jarjarka
- Budada kafeega oo ku jirta bacda filter-ka, bacaha shaaha
- Cawska xoolaha iyo cawska qalalan
- Lafo, baalal, timo
- Caleemaha, buraashka iyo laamaha
- Cuntada haraaga ah (oo aan lahayn baakad caag ah)
- Qashinka miraha ah (oo ay ku jiraan miraha liinta)
- Hashka iyo jajabyada alwaax ah (ee alwaaxyada aan la daweyn)
- Ubaxyo la jarjaray ama dheri la geliyay



MAYA!

walxahani laguma ridayo weelka qashinka waxyaabaha dabiiciga ah

- alwaax la daweyyay
→ Xarumaha dib-u-warshadaynta, meelaha yaryar ee laga aqbali karo qashin qubka
- Dhuxusha, qashinka, dambasta (lagu rido baco)
→ Qashinka haraaga ah
- Tiishuuyada waraaqaha ah
→ Qashinka haraaga ah
- Bacda nadiifiyaha fakiyuumka oo ku jira qashinka
→ Qashinka haraaga ah
- alwaax aan la daweyn
→ Xarumaha dib-u-warshadaynta, meelaha yaryar ee laga aqbali karo qashin qubka
- Xafaayadda, gurmada sigaarka, qashinka bisadaha (granules), saxarada xayawaanka
→ Qashinka haraaga ah




Talooyinka ka fogaanshaha qashinka

Isticmaal cuntada oo dhan

Isticmaal dhammaan cuntada, sameeyso liiska wax iibsiga oo fiiri gaar ah u yeelo nolosha qaybta cuntada markaad wax iibsaneysa.

Qalabyada korontada/elektrooniga waxaa ku jira walxo ceeriin ah oo qiimo leh!



Marka laga soo tago alaabta ceeriinka ee qiimaha leh sida naxaasta ama birta xaashida ah, waxa kale oo ay ku jiraan walxo deegaanka waxyeello u leh sida rasaasta ama cadmium-ka. Dhammaan qalabyada korontada waxaa si lacag la'aan loogu soo wareejin karaa xarumaha dib u warshadaynta iyo goobaha yaryar ee qashinka lagu uruuriyo. Qalabyada korontada ee yaryar ayaa sidoo kale lagu soo wareejin karaa goobta qashinka khatarta ah ee warwareega. Aaladaha korontada iyo elektrooniga ah ee waaweyn iyo kuwa badan, fadlan isticmaal adeegga qashinka ee waaweyn.



HAA!

alaabtan waxaa lagu ridayaa weelka qashinka korontada

- qalabyada korontada ama elektarooniga ah sida laylisyada, miinshaarada, mishiinada wax-shiidka, mashiinnada wax lagu shiido, bambooyinka, mishiinnada wax tolida
- qalabyada korontada ama elektarooniga ah ee ay carruurto ku ciyaaraan, sida tareenada, Gameboys ama baabuurta rimootka lagu xakameeyo
- Aaladaha elektarooniga ah ee waaweyn ee macluumaadka iyo madadaalada: Telefishinada, kombuyuutarrada, shaashadaha, mishiinnada fakiska, daabacadaha, sistemyada hi-fi, duubista fiidyowiyada
- Timo-qallajiyaha, dubaha rootiga, mishiinada kafeega, feerada, mashiinka shiilistaanka qotada dheer, qaseyaasha, kariyaha ukunta, kirliyada, marawaxada, mashiinada xiirashada, cadayga korontada, saacado, kamarado
- Qalabyada korontada ee guriga ee waaweyn: Qaboojiyaha iyo firijeerada, makiinadaha dharka iyo makiinada weel dhaqida, qalajiyaha dharka, shooladaha iyo foornooyinka, qalabka cunto kulayliyaha
- aaladaha caafimaadka sida shaashadaha garaaca wadnaha, cadaadiska dhiigga, heerkulbeegyada korontada
- Taleefanka, telefoonnada gacanta, makiinadaha jawaabta, raadiyaha, raadiyaha baabuurta, aaladaha MP3, kalkulaytarada



MAYA!

walxahani laguma daro weelka qashinka qalabyada korontada

- Nalalka tamarta kaydiya
→ Qashinka khatarta ah (oo lagu aqbalo goobta yar ee qashinka khatarta ah iyo goobta qashinka khatarta ah ee warwareega)
- Tuubooyinka nalalka dhaadheer
→ Qashinka khatarta ah (aqbalaada goobta uruurinta qashinka yar ee khatarta ah iyo goobta uruurinta qashinka khatarta ah ee warwareegta)



Qashinka elektiroonigga ah ayaa hadda si joogto ah loo ururiyaa: Ururinta alaabta ceeriinka ah ee qiimaha leh

Laga soo bilaabo Agoosto 15, 2018, baaxadda isticmaalka Xeerka Qalabyada Korontada iyo Elektrooniga ag (ElektroG) ayaa la ballaariyay. Qashinka elektiroonigga ah waa in laga soocaa qashinka kale si looga soo dhex bixiyo xitaa alaabta ceeriin ee qiimaha badan. Alaabta, dunta iyo dharka ayaa sidoo kale loo tixgaliyaa agab koronto haddii ay ku jiraan qaybo korontaysan.

Maxay tani kaaga dhigan tahay: Dhammaan dunta, dharka, kabaha ama alaabta guriga ee leh qaybo koronto ah ayaa ka gaynayaa xarunta dib u warshadaynta. Xataa haddii ay tahay uun laambad dhar lagu tolay. Weelasha qashinka lagu qaado oo ku habboon ayaa laga heli karaa halkaas. Tani waxay khuseysaa, tusaale ahaan, kabaha biligleynaya (kuwaaso ku jira LED-yo midab leh oo leh qalab elektaroonig ah iyo ilo koronto) iyo sidoo kale kursiga shaqada ee leh wax ka bedel koronto ama muraayadda qurxinta oo leh gees iftiin leh. Xeerka suulka: Haddiiba ay ku jiraan wax koronto la xiriira, waa qashin elektaroonig ah waxaana la geynayaa xarunta dib u warshadaynta. Tafaariiqlayaasha qalabyada korontada ayaa sidoo kale ku qasban inay dib u qaataan qalabyada.

Kuwan soo socdaa waxay khuseeyaan aaladaha korontada ee ay ku jiraan xogta shakhsiyeed: Ka tirtir dhammaan xogta shakhsi ahaaneed ee qalabka kaydinta ee aaladaada (PC-ga, moobilka, taleefanka casriga ah, taabletyada) oo ka saar kaararka SD (haddii ay ku jiraan).

Talooyinka ka fogaanshaha qashinka

U fiirso adkeysiga/ Isticmaal walxaha ilaa inta suurtoogalka ah

Kahor intaadan soo iibsan wax cusub, weydii naftaada inaad runtii u baahan tahay iyo in kale. Adkaysiga iyo dayactirka alaabta ayaa sidoo kale ah shuruudaha tayada muhiimka ah. Isticmaal dukaamada dayactirka..





Dhammaan qashinka aan dib loo warshadayn karin waxaa lagu ridayaa weelka qashinka haraaga ah.

Kaliya 15 ilaa 20% qashinka guriga ayaa dhab ahaantii ah qashinka haraaga marka loo eego sidaas. Haddii mugga weelku uu si ku-meel-gaar ah ugu filnaan waayo, waxaad ku iibsan kartaa bacaha qashinka haraaga ah lacag dhan 4.50 euro waxaadna dhigtaa dhinaca wadada maalinta bacaha la faarujinayo. Waxaad bacaha qashinka ka soo heli kartaa xarumaha dib u warshadaynta, goobta yar ee qashinka lagu ururiyo ama dukaanka deegaanka ee bartamaha magaalada (Luisenstraße 19). Waxaad iibsiyada dheeraadka ah ka heli kartaa internetka www.elw.de.



Qashinka haraaga ah ee laga soo aruuriyo Wiesbaden waxaa lagu wareejiyaa gawaarida waaweyn ee goobta qashinka ee ku taala goobta qashinka ee degmada Dyckerhoffbruch ka dibna waxaa la geeyaa laamaha qashinka lagu gubo si dib loogu warshadeeyo kulaylka.

Haddii aad qashinka haraaga ah geeyso xarumaha dib-u-warshadaynta iyo meelaha yaryar ee qashinka lagu uruuriyo, waxa lagugu soo dalacayaa kharashaad sidan soo socota:

Haddii aad qashinka haraaga ah geeyso xarumaha dib-u-warshadaynta iyo meelaha yaryar ee qashinka lagu uruuriyo, waxaa lagugu soo rogayaa 7,00 yuuro oo 80 litir oo qashin ah ama qayb ka mid ah. Tirada ka badan 5m3 waxa kaliya laga aqbali doona goobta yar ee qashinka lagu uruuriyo.

Weelasha qashinka haraaga ah waa la faarujiyaa iyada oo qayb ka ah adeeg buuxa; waxaa dibadda u soo saara oo haddana dib u soo celiya shaqaalaheenna ka dib marka ay faarujiyaan.



HAA!

alaabtan waxa lagu ridayaa weelka qashinka haraaga ah

- Qashinka ka imaanaya qeybta nadaafadda, sida xafaayadaha iyo tuwaalada nadaafadda
- Galka faylasha
- Warqadda wax dubista
- Muraayadaha shaashadda
- Muraayadaha liidhka
- alaabta guriga ee cilladaysan sida muraayadaha kiristalka, suxuunta, dheryaha dhoobada ah
- Muraayadaha fiilada leh (muraayadaha badbaadada)
- Galoofyada la tuuri karo
- Rashka (gubaday)
- Sawirrada
- Nalalka iftiinka
- Tixaha nadaafadda
- Warqadaha kaarboonka ah
- Daawooyinka
- Warqadda aboorka
- Maaskarada ilaalinta afka iyo sanko
- Cajaladaha muusiga iyo fiidiyowiyada
- Bacaha nadiifiyaha fakiyuumka, dambasta (ku jirta bac), qashinka, saxarada bisadaha, qashinka xoolaha
- Filimiyada Super 8
- Warqadda kuleylka
- warqad wasakh ah, taargooyin waraaqo ah, haraaga waraaqadaha sawirada waaweyn ah
- Sigaarka, gurmada sigaarka iyo dambaska



MAYA!

alaabtaani laguma ridayo weelka qashinka haraaga ah

- Bateriyooyinka
 - Waxaa lagu celinayaa dukaamada
- Qashinka dhismaha ee la kala soocay
 - Xarumaha dib u warshadaynta*, meelaha qashin-qubka yar-yar laga aqbalo ama adeegyada weelka
- CD-yada iyo DVD-yada
 - Xarumaha dib-u-warshadaynta, meelaha yaryar ee laga aqbali karo qashin qubka
- Kiimikooyinka, rinjiga, ku-milinka dareerayaasha, tuubooyinka nalalka dhaadheer
 - Ogolaanshaha goobta qashinka yaryar ee khatarta ah, ururinta qashinka khatarta ah ee warwareega)
- Qalabyada korantada iyo elekterooniga ah
 - Xarumaha dib-u-warshadaynta iyo meelaha yaryar ee laga aqbali karo qashinka
- Nalalka tamarta kaydiya
 - Qashinka khatarta ah (ogolaanshaha goobta yar ee qashinka khatarta ah, ururinta qashinka khatarta ah ee warwareega)
- Dhalooyinka iyo muraayadaha weelasha
 - Quraarada qashinka ah
- qashinka la gubi karo
 - Qashinka dabiiciga ah
- Warqadaha iyo kartoonaada
 - Warqadaha qashinka ah
- Toner-ka iyo khadda daabacaada
 - Xarumaha dib-u-warshadaynta iyo meelaha yaryar ee laga aqbali karo qashinka
- Baakadaha, qashinka caagga/birta ah
 - Weelka qashinka dib u warshadaynta

* Qashinka dhismaha ee wasakhaysan lagama aqbalo xarumaha dib u warshadaynta.



Talooyinka ka fogaanshaha qashinka Maro ah bedelka warqadda

Isticmaal maro iyo maro-gacmeedyo si aad isaga ilaaliso qashinka.

Qashinka khatarta ahi waa maaddooyin khatar ah iyo/ama sun ah oo u baahan in si gaar ah loo tuuro.

Guryaha gaarka loo leeyahay waxay qashinka khatarta ah si lacag la'aan ah ugu qashin-qubi karaan goobta yar ee lagu qubo qashinka khatarta ah iyo goobta qashinka khatarta ah ee warwareega.



HAA!

alaabtaani waxay ka mid yihiin qashinka halista ah

- Saliid la isticmaalay (ku soo celi dukaamada!)
- Rinjiga, waxyaabaha derbiga la mariyo, rinjiga emaalshanka ah
- kiimikooyinka dareeraha ah iyo kuwa adag (maarkuriga, kiimikooyinka shaybaadhka iyo sawirka)
- Qalabka dab-demiska (khidmad ayaa loo baahan yahay, barta la geynayo: Aqbalaada qashinka yaryar ee khatarta ah ee goobta qashinka)
- Daawooyinka looxa, sunta cayayaanka iyo dilaaga haramaha
- Xabagta, buuxinta iyo shaabadda
- Qalabyada yaryar ku jira sistemyada iftiinka iyo qalabka korontada
- Tuubooyinka nalalka dhaadheer, laambadaha tamarta-kaydiya iyo laambadaha uumiga meerkuriga
- Waxyaabaha milma nooc kasta ha ahaadaane (dhuuban, burush nadiifiye, wasakh ka saare)
- macdanta, khudaarta ama saliidaha, dufunta iyo shamacyada
- calal saliid leh iyo filtarrada saliidda
- Alaabta nadaafada nooc kasta ha ahaadaane (nadiifiyeyaasha musqulaha, alaabta daryeelka shakhsi ahaaneed, alaabta daryeelka baabuurka)
- Asidhka iyo alkaliska (ashitada bateriga, asidhka haydhorokooloriga, dareeraha amooniyada)
- Daasadaha buufiska ah nooc kasta ha ahaadaane oo ay ku jiraan waxyaabo haraaga ah (rinji, nadiifiyeyaasha, xumbo PU)
- Baytariyada qallalan, qalabyada koronto kaydinta, baytariyada baabuurta

MAYA!

alaabtaani kama tirsana qashinka khatarta ah

- Dhululubada gaasta lagu cadaadiyo
→ Waxaa lagu celinayaa dukaamada



Alaabooyinka noqda qashinka khatarta ah marka la tuuro waxaa lagu aqoonsan karaa calaamada labajibbaaran, ee halista tilmaamaysa ee midabka jaallaha ah ama qoraallada sida "holci kara", "indhaha dhiba" ama "waxyeello keena haddii la nuugo". Qashinka khatarta ah ee ka imanaya Wiesbaden waxa si xirfad leh iyo hab deegaanka u roob u maareysa HIM GmbH.

Taariikhaha ururinta qashinka khatarta ah ee warwareega waxaa laga heli karaa internetka www.elw.de.

Adigoo isticmaalaya adeega uruurinta qashinka khatarta ah ee warwareega waxaad sidoo kale:

- U gayn kartaa qalabyada korontada ee yaryar (sida timaha qalajiyaha, mandiiil, cadayga korontada)

Talooyinka ka fogaanshaha qashinka

Beteriyada dib loo buuxin karo bedelka beteriyaada caadiga ah

Halkii aad ka isticmaali lahayd beteriyaada, waxaad isticmaashaa beteriyaada dib la jaajareyn karo; gadashada jaajare ayaa siyaabo badan u qiimo badan.





Qashinka badan waxaa ka mid ah dhammaan alaabada waaweyn iyo agabyada guriga ee aan ku habboonayn weelka qashinka caadiga ah ee haraaga ah sababo la xiriira cabbirkooda ama miisaankooda.

Fadlan qorshayso taariikhda ururinta ee adeegeena qashinka weyn adigoo wacaya 0611 7153-0. Aruurinta qashinka badan waa u lacag la'aan guryaha gaarka loo leeyahay ilaa afar jeer sanadkiiba ilaa mug dhan shan mitir kuyuub ah halkii safarba. Gaadida qashinka badan ee la geeyo xarumaha dib u warshadaynta iyo goobta yar ee laga aqbalayo qashin qubka waa lacag la'aan ilaa xadka muga 700 litir ah (mugga gaariga).



HAA!

alaabtan waxay ka mid yihiin qashinka badan

- Sariiraha iyo furaashyada
- Kombiyuutarrada, daabacayaasha, mishiinnada fakiska, sistemyada hi-fi, telefishinnada, shaashadaha, qalabyada cunto kululaynta
- Qalabyada guriga iyo beerta, roogagyada
- Gawaarida carruurta, baaskiiladaha
- Makiinada wax lagu karsado, foornooyinka, makiinada dharka lagu dhaqo, makiinada weelasha lagu dhaqo, talaajadaha iyo qaboojiyaha



MAYA!

alaabtaani kama tirsana qashinka waaweyn

- Qashinka ka soo baxa dib-u-habaynta dhismaha, sida burburka, dhagxaanta, tiirarka
- Biyaha
- Laamaha iyo jarjarka caleenta
- Qubeyska, tubbada qubayska, goobta weelasha lagu dhaqo, weelasha musqusha
- Qalabyada korontada ee yaryar
- Daaqadaha, albaabada (dabka), albaabada garaashka, laminateerka iyo sagxada
- Shacaac-bixiyayaasha, haamaha saliidda
- Sanduuqyada kartoonaada
- Bacaha balaastikada ah oo leh qashinka haraaga ah
- Muraayad

→ Qashinka hoos yimaada qaybta "Maya" ma qaadi doono adeega qashinka badan. Waxa la geyn karaa goobta yar ee qashinka lagu ururiyo ee ku taal aqashin-qubka ama xarumaha dib u warshadaynta.

Alaabooyinka waaweyn oo ay ku jiraan walxaha korantada ama elektiroonigga ah, sida armaajooyinka qolka fadhiga ama kursiga duugista, ayaa wali loo diiwaan gelin karaa qashin weyn ahaan sida caadiga ah waxaana lagu soo qaadi doonaa lacag la'aan.

Halkaan marka ay marayso waxaan codsanaynaa:

Haddii ay suurtagal tahay, kala saar qaybaha korantada iyo alaabta guriga inteeda kale, tusaale ahaan adigoo ka saaraya matoorka ama nalalka. Haddii aysan lahayd qayb elektiroonig ah, alaabta guriga waxaa lagu xisaabinayaa qashinka waaweyn ee intiisa kale. Waxaad qaybaha korantada (electronic) geyn kartaa xarumaha dib u warshadaynta. Markaad naga caawiso waxaan ka badbaadi karnaa, in xaddi badan oo qashin ah loo qaado laanta daaweynta qashinka si aan loo baahnayn sababo la xiriira qaybo yar oo elektaroonik ah oo ku jira awgood.

Taariikhda ururinta qashinka badan waxay caadi ahaan ahaan doontaa tobanka ilaa laba iyo tobanka maalmood ee shaqada ee soo socda. Waxa kale oo aad ballan qabsan kartaa dhawr toddobaad ka hor qorshaynta muddada-dheer.

Fadlan qashinka badan dhig meel si cad oo muuqda oo la heli karo oo wadada dhinaceeda ah ugu horrayn fiidkii ka hor taariikhda lagu heshiiyey iyo ugu dambayn 6 a.m. maalinta la ururinayo qashinka. Gaadiidka waa in aan la xannibin. Haddii aysan suurtagal ahayn in qashinka weyn la dhigo jidka dhinacisa, fadlan la xirii shaqaalaha adeegga qashinka badan.



Adeegga qashinka badan:
0611 7153-0



Talooyinka ka fogaanshaha qashinka

U fiirso adkeysiga, isticmaal suuqyada xaraashka

U fiirso cimriga dheer ee alaabta korontada ee guriga iyo alaabta guriga. Haddii alaabta guriga ama qalabyada waaweyn ee guriga ee aad rabto inaad beddesho weli la isticmaali karo, isticmaal → Suuqa wax-is-bixinta ELW, dukaanka alaabta celiska ah ee "fastwieneu" ama suuqyada xaraashka ee gobolka.

Qashin ka samaysan balaastiig, biro iyo walxo isku dhafan ayaa lagu ururiyaa weelka qashinka dib u warshadaynta



Weelka qashinka dib-u-warshadaynta waxa lagu heli karaa cabbirro 120 litir, 240 litir iyo 1,100 litir ah. Weelka qashinka dib-u-warshadaynta ayaa la faarujiyaa 14 jeer maalintii. Waxaad ka heli kartaa taariikhaha jadwalka qashinka qaadista www.elw.de ama ablikeeshinkeena jadwalka.



HAA!

alaabtaani waxaa lagu ridayaa weelka qashinka dib u warshadaynta

Baakado fudud oo ka samaysan caag, bir ama walxo isku dhafan, sida

- Kartoonada cabitaanka
- Koobabka yoghaatiga, dhalooyinka caaga ah, tuubooyinka
- Gasacadaha
- Bacaha balaastikada ah (sidoo kale laga sameeyay bioplastiga)
- Styrofoam

Qashinka caagga ah, sida

- Islaaydhyada
- Weelasha qaboojiyaha, sanduuqyada gaadiidka
- Gasacadaha waraabinta dhirta, dheryaha dhirta
- Alaabta carruurta
- Baaldiyada caaga ah, maddiibado

Qashinka birta ah, sida

- Madiibado alimuuniyam ah
- Alaabta cunto kariska
- Dheriga wax lagu karsado, digsiyada, daasadaha wax lagu dubo, saxarada dubista
- Kiyaaawe
- Nalalka shaaha (gubtay)
- Qalabyada



MAYA!

alaabtaani laguma ridayo weelka qashinka dib u warshadaynta

- Muraayadaha
→ Quraarada qashinka ah
- Warqadaha iyo kartoonada
→ Warqadaha qashinka ah
- Gasacadaha buufinta ee leh xumbo PU ah
→ Qashinka khatarta ah
- polystyrene-ka wasakhda ah, looxyada polystyrene-ka (qalabyada dhismaha)
→ Adeegga qashinka ama weelka haraaga ah



Shirkadda Meinhardt Städtereinigung GmbH waxay faarujisaa weelasha qashinka dib u warshadaynta ee magaalada oo dhan. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan faarujinta, fadlan si toos ah ula xiriir Meinhardt, taleefanka: 0800 5889720.

Weelasha qashinka dib-u-warshadaynta waa inay diyaar u yihiin faarujinta 6 a.m. ee maalinta la ururinayo qashinka waana in la soo celiyaa ka dib marka la faarujiyo. Weelka qashinka soo dhig wadada dhinaceeda si uusan weelka carqalad ugu noqonin dadka lugeynaya ama gaadiidka wadooyinka.

Talooyinka ka fogaanshaha qashinka

Loogu talagalay jidka

Caaga kafeega lagu qaato, isticmaal koobabka kulaylka ee dib loo buuxin karo.



Diiwaanka qashinka*

A

Aashitada beteryada	9
Agabyada beerta	10
Alaabta carruurta ku ciyaarto (caag ah)	11
Alaabta carruurta ku ciyaarto (koronto)	7
Alaabta cunto kariska	11
Alaabta guriga	10
Asidhka haydhorokooriga	9
Asiidhyada	9

B

Baakadaha ka samaysan balaastiig, bir, agabyo isku dhafan	11
Baakadaha khafiifka ah	11
Baakadaha miisaanka fudud (LVP)	11
Baakadaha waraaqaha, kartoonaada	5
Baldi	11
Baaldiyada caagagga ah, dhalooyinka caagagga ah	11
Baaskiiladaha	10
Bac	11
Bacaha rootiga	5
Bacaha shaaha	6
Bacda nadiifiyaha fakiyuumka oo ku jira qashinka	8
Bambo	7
Baqshadaha (sidoo kale leh daaqad wax laga dhex arki karo)	5
Batariyada baabuurta	9
Batariyada baabuurta	9
Bateriyoyinka	9
Betaryada qallalan	9
Biraha sariiraha	10
Birta/feero	7
Biyaha	10
Biyaha wasakhda ah	6
Budada kafeega	6
Budooyinka nadaafadda	9
Buraashka cadayga (korontada)	7
Butiga	9
Buugaagta	5
Buugaagta	5
Buugaagta Meenuuga ah	5
Buug-yaraha	5

C

Cajaladaha muusiga iyo fiidiyowiyada	8
Caleemaha	6
Cawska qalalan	6
CD-yada iyo DVD-yada	8
Cuntada haraaga ah	6
Cunto haraa ah	6

D

Daasadaha buufinta (iyo wixii ku soo hara)	9
Daasadaha wax lagu dubo, saxaaradda wax lagu dubo	11
Daawooyinka sunta cayayaanka	9
Daawoyinka dhirta	9
Daboolka birta	11
Dambaska sigaarka, mudka sigaarka	8
Dambasta	8
Dareeraha aalkalaaynka	9
Dareeraha Amooniyamka	9
Dareeraha milanka ah	9
Dhalooyinka (galaas)	4
Dhalooyinka baakadaha	4
Dhalooyinka jaamka	4
Dhalooyinka quraaradaha ah ee la tuuri karo ...	4
Dheriga dhirta	11
Dheriga dhoobada ah	8

Dheriga wax lagu karsado	11
Dhoobo	8
Dhululubada gaasta lagu cadaadiyo	9
Dhuxul (koronto)	7
Digsiyada	11
Dubaha rootiga	7
Dufanka	9
DVD-yada	8

E

F

Fiidiyow duube	7
Filimiyada Super 8	8
Foornooyinka	7
Furayaasha (korontada)	7

G

Galaasyada cabitaanka	4
Galaasyada muraayadaha	8
Galka faylasha	8
Galoofyada la tuuri karo	8
Gameboys-yada	7
Gasacadaha	11
Gasacadaha waraabinta	11
Gawaarida carruurta	10
Goynta cawska	6
Goynta geedaha	6
Goynta xayndaabka	6

H

Haraaga waraaqaha derbiyada lagu qurxiyo	8
Heerkulbeegga caafimaadka (koronto)	7
Heerkulbeegga caafimaadka (oo leh meerkuri)	9

I

Isbiringiska	6
Isku-xirka	8
Islaaydhyaada	11

J

Jeegaga dhalada ah ee Mason	4
Joodariyaal	10
Joornaallada	5

K

Kalkulaytar	7
Kamaradaha	7
Kartoonada caanaha	11
Kartoonada cabitaanka	11
Khadda daabacaada	8
Khadda Toner	8
Khafiifyada (diluent)	9
Kiimikada sawirka	9
Kiimikooyinka	9
Kirli	7
Kiyaawe	11
Koob yoghaat ah	11
Koobabka (yoghatiga, iwm.)	11
Koolo/dhacaanka geedaha	9
Kumbuyutarrada	10

L

Laamaha	6
Laambiyada meerkuriga uumiga	9
Lafo	6

M

Maaskarada ilaalinta afka iyo sanko	8
Madiibado alimuuniyam ah	11
Makiinada alaabta lagu dhaqo	7, 10

Diiwaanka qashinka*

Maro saliid leh iyo filtarrada saliidda	9	Rashka	8
Marwaaxadaha	7	Rinjiyada	9
Masaxarada Cellulose-ka	8	Rinjiyada kala firdhisn	9
Mashiinnada jawaab celinta	7	Roogyada	10
Mashiinka daabacaada	10	S	
Mashiinnada dharka lagu dhaqo	7, 10	Saacadaha	7
Mashiinnada Fakiska	10	Saliid la isticmaalay	9
Mashiinnada harqaanka	7	Saliida (macdanta, khudradda, synthetiga)	9
Mashiinnada qaxwada	7	Sanduuqyada gaadiidka	11
Mashiinnada qodista	7	Sanduuqyada kartoona	5
Meerkuriga	9	Sawiro, waraaqo sawiro	8
Midabada	9	Saxan warqad ah	5
Mudka sigaarka, Mudka sigaarka	8	Seraamikiska	8
Muraayad	10	Shaashada muujisa garaaca wadnaha	7
Muraayadahav	4	Shaashadaha lagu cabiro cadaadiska dhiigga ...	7
Muraayadaha badbaadada ee fiilada ah ee		Shaashado	7
daaqadaha	8	Sharootooyinka	9
Muraayadaha Kiristalka	8	Shiiditaanka	7
Muraayadaha kulaylka u adkaysta	4	Shiilitaanka qotada dheer	7
Muraayadaha liidhka	8	Shooladaha jikada	10
Muraayadaha shaashadda ee		Sistemyada Hi-Fi	7
telefishinada/kombiyuutarada	8	Styrofoam, muraayadaha Styrofoam	11
Muraayadda weelasha	4	Suxuunta	8
N		T	
Nadiifiyaha buraashka ah	9	Taleefanka	7
Nalalka iftiinka	8	Taleefanka gacanta	7
Nalalka shaaha	11	Tiishuuyada waraaqaha ah	6
Nalalka tamarta kaydiya	9	Timaha	6
O		Timo-qalajiyaha	7
P		Tixaha nadaafadda	8
Porcelain	8	Tuubooyinka	11
Q		Tuubooyinka nalalka dhaadheer	9
Qaboojiyaha	7, 10	TV-ga	7, 10
Qaboojiyayaal	10	U	
Qalabka cabitaanada lagu shiido	7	Ubax jarayaasha	6
Qalabka cuntada lagu kululeeyo	7	Ubaxyada ku jira dherga	6
Qalabka dab-demiska	9	Ukun kariyaha	7
Qalabka MP3 player	7	V	
Qalabyada	11	W	
Qalabyada dhulka	8	Waraaqaha kumbuyuutarka	5
Qalabyada korontada ee guriga ee waaweyn ...	7	Waraaqaha nadaafadda	8
Qalabyada korontada, shooladaha korontada ku		Waraaqaha qashinka ah	5
shaqeeya, qashinka elektarooniga ah	7	Waraaqaha wax qoritaanka	5
Qalabyada koronto kaydinta ee yaryar	9	Wargeysyada	5
Qalabyada wax lagu aruuriyo	9	Warqad (dahaaran iyo mida aan dahaaranayn)...	5
Qalabyada xiiritaanka timaha	7	Warqad (wasakh ah)	8
Qalajiyaha taambolka	7	Warqadaha kaarboonka ah	8
Qashin badan	10	Warqadaha wax lagu duubo	6
Qashinka	8	Warqadda aan garaasiyada lahayn	5
Qashinka beerta	6	Warqadda aboorka	8
Qashinka bisadaha	8	Warqadda kuleylka	8
Qashinka dhismaha	8	Warqadda nugul-bixinta	5
Qashinka galaaska/dhalooyinka ah	4	Warqadda wax dubista	8
Qashinka halista ah	9	Wasaq ka saaraha	9
Qashinka haraaga ah	8	Weelasha dhalooyinka daawada	4
Qashinka khudradda ah	6	Weelasha qaboojiyaha	11
Qashinka la gubi karo	6	X Y Z	
Qashinka miraha	6	Xaarka xoolaha	8
Qashinka xayawaanada yaryar	8	Xabagta	9
Qolfoofka ukunta	6	Xafaayadda	8
Qoryaha cadayga	6	Xashka alwaaxda	6
Qoryaha looxa, dhuxusha	8	*Qamuuska alifbeetada qashinka www.elw.de	
Qoryaha wax lagu ilaaliyo	9		
Qoryo (la daweeay, aan la daawayn)	6		
R			
Raadiyaasha	7		
Raadiyaha baabuurta	7		

Tafatire

ELW

(Shirkadda maaraynta qashinka ee caasimadda gobolka Wiesbaden)

Unterer Zwerchweg 120

65205 Wiesbaden

Taleefanka: 0611 7153-0

Iimayl: elw@elw.de

www.elw.de

**Tifaftirka**

ELW, Shirkadaha Isgaarsiinta

Naqshadeynta

pure:design, www.pure-design.de

Sawirrada

Shutterstock, Adobe Stock

Daabacaada

AC medienhaus, Wiesbaden

Waxaa lagu daabacay warqadaha dib loo warshadeyn karo

© ELW 2024

Abfalltrennung / Waste separation / Сортировка бытовых отходов /
Atık ayrıştırma / Segregacja śmieci / Separarea deșeurilor / Séparation des déchets /
Kala soocida qashinka / فصل النفايات / تفکیک پسماند / تفکیک زباله



Bioabfall / Bio-waste / Биоотходы / Biyoatık / Odpady organiczne / Deșeuri bio / Compost /
Qashinka waxyaabaha dabiiciga ah / النفايات العضوية / پسماند زیستی / زباله ارگانیک



Altpapier / Waste paper / Макулатура / Atık kâğıt / Makulatura / Deșeuri de hârtie / Vieux papiers /
Waraaqaha qashinka ah / الورق المستعمل / کاغذ کهنه / کاغذ و مقوای باطله



Wertstoffe / Recyclables / Вторсырье / Değerli maddeler (geri dönüştürülebilir nesnelər) /
Surowce wtórne / Deșeuri reciclabile / Matières de valeur / Agabyada dib loo warshadayn karo /
المواد القابلة للتدوير / پسماند قابل بازیافت / مواد قابل بازیافت



Restabfall / Residual waste / Остаточные отходы / Geri dönüştürülemeyen atıklar /
Pozostałe odpady / Deșeuri nereciclabile / Déchets résiduels / Qashinka haraaga ah /
پسماند غیر قابل بازیافت / پسماند غیر قابل بازیافت / النفايات المتبقية



Service-Center
0611 7153-0

ELW

